

Xadka Shaqada Todobaadka iyo Qalabka Jadwalka Wakhtiga Dheeraadka ah

Xisaabiyaha kalandarkan waxaa loogu talagalay Daryeel bixiyayaasha Qofka (IPs) iyo macamiisha si uu ugu caawiyo saacadaha jadwalka. Isticmaalida qalabkan wuxuu ku caawin doonaa Daryeel bixiyaha Qofka iyo macamiilka in uu ka fogaado sheegashada dheeraadka ah (ku shaqaynta in la dhaafto xadka shaqada Daryeel bixiyayaasha Qofka iyo saacadaha bilaha ah ee macamiilka).

Xusuusin:

- Ha shaqaynin saacado ka baddan kuwa aad ku haysatid xadkaaga shaqada todobaadka adiga oo aan oggolaansho ka haysanin dhinaca Waaxda Adeegaha Bulshada iyo Caafimaadka
- Ha shaqaynin saacado bilo ka baddan kuwa uu macamiilku u qalmo in uu qaato

Tilmaamaha:

1. **Xadka Shaqada Todobaadka:** Gal xadka shaqadaada todobaadka ah ee lagaaga qoondeeyay dhinaca Waaxda Adeegaha Bulshada iyo Caafimaadka. Haddii aadan garanaynin xadka shaqadaada todobaadka, la xiriiir Maamulaha Kiiska macamiilka.
2. Geli lambarka saacadaha (ay ku jirto saacadaha afar meelood meel) aad qorshaynaysid in aad ka shaqaysid maalin kasta kalandarka bil kasta.
3. Qalabka wuxuu xisaabi doonaa kuwaan soo socda:
 - a. Tirada saacadaha guud ee todobaadka shaqada waxay yihiin kuwa ku qoran khaanada **cagaaran** ee ugu horeysa (todobaadka shaqada = Axada 12:00 duhurnimo-Sabtida 11:59 habbeenimo habbeenkii)
 - b. Tirada saacadaha guud ee dheeraadka ah ee todobaadka shaqada waa kuwa ku qoran khaanada **cagaaran** ee labbaad (todobaadka shaqada = Axada 12:00 duhurnimo-Sabtida 11:59 habbeenimo)
 - c. Tirada saacadaha guud ee laga shaqeeyay bisha – Midaan waxaa lagu qoray midigta khaanada **jaalaha** koowaad. Lambarkan waa in uusan noqonin mid ka baddan saacadaha bileed ee macmiilka ama bilahaaga lacag bixinta lagu oggolaaday.
 - d. Tirada saacadaha guud ee dheeraadka ah ee la shaqeeyay bisha- Midaan waxaa lagu qoray khaanada **jaalaha** labbaad
 - e. Tirada guud ee saacadaha dheeraada ah ee ka baddan xadka bisha loogu talagalay – Midaan waxaa lagu qoray gudaha khaanada **GUDUUDAN**. Haddii ay jiraan wax saacado ah oo lagu qoray khaanadan, waxaad shaqaysay wax ka **BADDAN** xadka shaqada todobaadkaaga. Waxaad u baahnaan doontaa in aad isbedelo ku samaysid xisaabta kalandarka si aad midaan u saxdid.

Wax kasta oo saacado ah oo la geliyay wax ka baddan 40 gudaha xadka shaqada todobaadka waxaa loo xisaabi doonaa sida xadka dheeraadka ah ee bisha

Halkan waxaa ku qoran sida ay xisaabtu u shaqayso:

Tusaale:

Xadka shaqada todobaadka Jose waa 46 saacadood. Tirada dheeraadka ah ee bilaha midaas oo Jose shaqayn karo waa mid ku tiirsan tirada maalmaha Sabtida ah ee uu shaqayn doono bisha.

Xisaabta loogu talagalay bilaha ah 5 maalmood oo Sabti ah: $46 \text{ saacadood} - 40 \text{ saacadood} = 6 \text{ (saacadaha dheeraadka ah)} \times 5 \text{ (Maalmaha Sabtida ah)} = 30 \text{ saacadood OT bil kasta ah}$

Xisaabta loogu talagalay bilaha ah 4 maalmood oo Sabti ah: $46 \text{ saacadood} - 40 \text{ saacadood} = 6 \text{ (saacadaha dheeraadka ah)} \times 4 \text{ (Maalmaha Sabtida ah)} = 24 \text{ saacadood OT bil kasta ah}$

*Macamiilka Jose u shaqeeyo wuxuu uga baahanyahay in uu shaqeeyo jadwal la bedeli karo inta lagu guda jiro bisha. Jose midaan wuu samayn karaa intiiba uusan shaqaynin wax ka baddan 30 saacadood oo dheeraad ah bilaha ah 5 maalmood oo Sabti ah, ama 24 saacadood oo dheeraad ah bilaha ah 4 maalmood oo Sabti ah. Khaanadaha **jaalaha ah** ee ku yaala qalabka waxay Jose ku caawinayaan in uu ahaado gudaha xadka dheeraadka ah ee bil kasta ah.*